# U sheeg xerada qaxootiga xogta ku saabsan meelaha lagaala soo xiriiri karo, iyo haddii inaad maqnaato ay suurtaggal noqoto



Xarunta aad macmiil ahaan uga diiwaangashan tahay oo keliya ayaad ka heleysaa adeegyada qaabilaadda.

Xerada qaxootigu waxaa ay wakhtiyada qaarkood hubinaysaa, in aad wali ku sugan tahay gudaha Finland iyo in aad u baahan tahay adeegyada qaabilaadda iyo inkale. Haddii xerada qaxootigu ay ku ku heli weyso, waxaa dhici karta in lagaa joojiyo adeegyada qaabilaadda.

**Sababtaas awgeed waa muhiim in xerada qaxootigu ay hayso xogta ku saabsan meelaha hadda lagaala soo xiriiri karo (cinwaanka, telefoonka iyo iimeylka), si ay kuula soo xiriiraan oo kuu helaan markii loo baahdo.**

## Ka maqanaanshaha xerada

Waxaad xaq u leedahay in aad si xor ah ugu dhex socoto Finland gudaheeda, iyo in aad ka baxdo aagga xerada qaxootiga. Si kastaba ha ahaatee, kama bixi kartid dalka Finland, haddii aad ka baxdo dalka Finland codsigaagii magangelyodoonista waa la kansalayaa, taasoo macnaheedu yahay in la joojinaayo falanqayntiisa ama go'aan ka gaaristiisa.



Haddii aad deggan tahay xerada qaxootiga, islamarkaana aad doonayso in aad xerada ka maqnaato wax ka badan 7 maalmood, waa in aad arrinkaas wakhti hore kala heshiiso xerada qaxootiga. Waxaad xerada ka maqnaan kartaa ugu badnaan 14 maalmood, haddii aysan jirin wax sabab gaar ah oo keeni karta in aad ka maqnaato xerada muddo intaas ka badan. Inta aad ka maqan tahay xerada muddadaas laguu oggol yahay, xerada qaxootigu waxaa ay kuu hayn doontaa booskaaga hoyga.

### U soo sheeg xerada qaxootiga, haddii aad ku talajirto in aad si joogto ah uga baxdo dalka Finland

Hore ugu soo sheeg xerada qaxootiga haddii aad ku talajirto in aad si joogto ah uga baxdo dalkaan Finlad. Wargelinta waa in aad samaysaa xittaa haddii aad deggan tahay xerada qaxootiga bannaankeeda. Haddii aad Finland si joogto ah uga baxdo, codsigaagii magangelyodoonista waa la kansalayaa, taasoo macnaheedu yahay in la joojinaayo falanqayntiisa ama go'aan ka gaaristiisa.

## Degaanka gaarka ah ama baraayfadka ah

Haddii aad doonayso adiga ayaa si iskaa ah u diyaarsan kara degaanka aad ku noolaanayso. Arrinkaan waxaa loo yaqaan degaanka gaarka ama baraayfadka ah.

- Goobta degaanka waa in ay noqotaa meel loogu talaggalay in lagu noolaado, islamarkaana leh cinwaan rasmi ah oo waraaqaha laguugu soo diri karo.

- Waa in aad deggan tahay cinwaankaas aad soo sheegtay.
- Boostada waxaad ka samaysaa wargelinta isbeddalka guuritaanka ee cinwaanka aad ku nooshahay(muuttoilmoitus).
- Cinwaankaaga cusub ee hoyga aad iskaa u diyaarsatay waa in aad si qoraal ah ugu wargelisaa xerada qaxootiga. Arrinkaan waa muhiim si aad u sii hesho xuquuqdaada adeegyada kale ee qaabilaadda.

## Dhammaadka macmiilnimada

Macmiilnimadaada xerada qaxootiga waa la joojin karaa, haddii

- adiga lagugu tuhunsan yahay ama la ogyahay in aad si joogto ah uga baxday dalka Finland,
- adiga si shakhsi ahaan ah aysan xerada qaxootigu xiriirkaaga u helin muddo laba bilood ah,
- xerada qaxootiga ma heli karto xiriirkaaga, iyagoo soo wacaaya lamabarkii telefoonka ee aad siisay ama aad u sheegtay,
- waad ka maqnayd xerada, kumana aadan soo noqon wakhtigii lagu heshiiyay,
- ma aadan soo sheegin cinwaankaaga hoyga gaarka ama baraayfadka ah, ama ma degganid cinwaanka aad sheegtay.

Xarunta qaabilaadda waxaa ay isku dayi doontaa in ay kula soo xiriirto si ay u ogaato xaaladdaada kahor inta aysan go'aan ka gaarin joojinta macmiilnimadaada. Sidaas darteed waa arrin aad muhiim u ah in aad had iyo goor cusboonaysiiso xogtaada ku saabsan halka lagaala soo xiriiri karo, islamarkaana aad ka jawaabto markii xerada qaxootiga lagaa soo waco ama farriin laguu soo diro.

Haddii xerada qaxootiga ay kula soo xiriirto, waxay kaa codsan kartaa in aad si shakhsi ahaaneed u timaaddo xerada ama aad soo gudbiso cinwaankaaga hoyga gaarka ah. Arrinkaan waa shardi muhiim u ah oo ku xiran sidii aad u sii haysan lahayd booskaaga hoyga iyo adeegyada xerada qaxootiga.

Haddii xerada qaxootiga aanay ku helin marka ay kula soo xiriirto, macmiilnimadaada waa la joojin doonaa, mana heli doontid adeegyada xerada qaxootiga. Waxaa intaas dheer in xerada qaxootigu ay maqanaanshahaaga ku wargelin doonto booliiska iyo Hoggaanka socdaalka. Laba bilood ka dib wargelintaas, Hoggaanka socdaalka waxaa uu gaari doonaa go'aanka ah kansalista ama burinta codsigaagii magangelyada.

## Dib ugu soo laabashada adeegyada xerada qaxootiga

Haddii aad dib ugu soo laabato xerada qaxootiga markii macmiilnimadaada la joojiyay kaddib, xaruntu waxaa ay arrintaas ku wargelin doontaa booliska iyo Hoggaanka socdaalka. Xerada qaxootiga ayaa markaa baari doonta arrinka la xiriira in aad weli xaq u leedahay adeegyada qaabilaadda iyo inkale.

Haddii aad weli xaq u leedahay adeegyadaas oo aad u baahan tahay hoy ama guri, waxaa lagugu hagayaa ama laguu gudbinayaa xero kale oo uu boos ka bannaan yahay. Waxaa dhici karta in aysan wax boos ah ka bannaanayn xerada ku taalla magaalada aad doonayso in aad ku noolaato.

Sidoo kale waxaad xaq u leedahay in aad soo sheegto cinwaankaaga hoyga gaarka ama baraayfadka ah (yksityismajoitus), laakiin waxaa laga yaabaa in lagaa codsado in aad si shakhsi ahaaneed ah isaga soo diiwaangeliso xerada qaxootiga.

## Diidmada adeegyada xerada qaxootiga



Haddii aadan rabin khasab kuguma ahan in aad noqoto macaamiil ka tirsan xerada qaxootiga. Haddii aad doorato in aadan noqon macmiil ka tirsan xerada qaxootiga, ma heli doontid adeegyada ay bixiso xerada qaxootiga, islamarkaana waa in aad adigu si iskaa ah isaga bixisaa tusaale ahaan adeegyada caafimaadka. Sidoo kale ma heli doontid lacagta qaabilaadda. Waa in aad adiga keligaa ka dhammaysatid Hoggaanka socdaalka arrimaha la xiriira sharciga degganaanshaha, islamarkaana aad xil iska saarto in aad si toos ah ugu sheegto Hoggaanka socdaalka macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan halka adiga lagaala soo xiriiri karo.

**Hagista iyo macluumaadka dheeraadka ah waxa aad mar walba weydiin kartaa xeradaada qaxootiga.**